# TUSAHA C

*Ee Waalidka iyo HagahaParent Idman*

Tusaha C waxa uu ka koobanyahay qoraalo ay degmadu u adeegsan doonto qaab ay kula xidhiidho waalidiinta, hagaha idman iyo ardayda tan la xidhiidha isbedeladda. fadlan ogoow kuwani ma ahan waraaqo isdiiwaangil, oo keliya waxaa looga golleeyahay sharxidda nidaamka cusub iyo wargelinta maxsuulka warcelinta ee doonistooda. degmadu waxay doonaysaa in ay dib u eegaan waraaqahooda diiiwaangelinta si ay ola saanqaado shuruudaha cusub.

# Warqad Tusaale ah oo ku jeeda Waalidka/Hagaha Idman

(school info here)

Guga 2010

Waalidka iyo Hagaha Idman ee Qaaliga ah

Laga bilaabo Guga 2010 waxaa jira isbedelo aanu doonayno in aan kugu wargelino.

Sanad walba, degmadda dugsiyadda ee Oregon waxaa laga doonayaa in ay ka warbixiyaan isirka iyo hab-dhaqanka arday walba tan oo ay ku hagaajinayaan Wasaaradda Waxbarashadda ee Oregon(ODE) ODE waxay si guud oga warbixin doontaa macluumaadka heer dugsi tan oo la gaadhsiin doono dowladda dhexe warbixinadaa waxaa qayb ahaan ku jira;

- Isbedlka xaaladda isdiiwaangelin ee ardayga
- Hubinta in ubad walba uu helo barnaamijyadda iyo adeegyadda waxbarasho ee ay mudanyihiin.

Dowladda dhexe waxay sameeyeen shuruudo cusub oo ku jeeda sida degmooyinka dugsiyadu u uruurinayaan, kaydinayaan islamarkaana ay oga warbixinayaan macluumaadka isir iyo hab-dhaqan ee ardayda iyo howlwadeenadda. wax iska bedelay ma jiraan illaalinta khusuusiyaadka iyo xuquuqda shakhsiga, oo kleiya waxaa isbedelay qaababka loo uruurinayo iyo warbixinta. laga bilaabo Guga 2910 waxaanu codsanaynaa in ay isu tilmaamaan dhamaan ardayda iyo shaqaalaha si waafaqsan shuruudaha cusub. Ujeedada uruurinta macluumaadkaa waxaa weeye in ay gaadho degmadeedan haqabtirka baahida dhamaan ardayda iyo caawinta in najaxa sare ee caalamiga ah.

Kuwan soo socda waa fikrad guud oo la xidhiidha nidaamka cusub.waanu garowsanahay in ay jiri karaan cabashooyin sababo dhowr ah waxay utaagan yihiin in ay ka jawaab dhamaan su'aalihiina. hadii aad qabto su'aalo dheeri ah fadlan eeg Su'aalaha Sida Badan la is waydiiyo iyo (Maamulka dugsigiina ama adeegaha degmadda ee qaybtaa).

Mahadsanidin
Madaxa Dugsiyadda Degmadda

*Fadlan ogoow tani ma han warqadda macluumaad uruurin waxaa loogu talagalay oo kleiya so bandhiga macluumaadka*

**Laga bilaabo Guga 2010 waxaa jiri doonaa laba su'aalood oo qof walba la waydiin doono, labada su'aalna waa in looga jawaabaa sida ay uyihiin keydka howlwadeenka ama arayda si loogu tixgeliyo in ay dhamaystirantahay Wasaaradda Waxbarashadda.**

**Su'aasha #1:**
*Ma waxaad tahay Latino mise Hisbaanik?Haa_____ Maya_______________*

*Dhamaan dadka kasoo jeeda dalalka lagaga hadlo luqadda isbaanishka ee Wuqooyiga, badhtamaha ama Koonfurta Ameerica, iyadii oo aan loo eegaynin isirka ama luqadoodii asalka ahayd. waa in ay ku jawaabaan haa. dhamaan dadka ku jawaaba HAA su'aasha koowaad waxaa looga warbixin doonaa in ay yihiin Arday ama shaqaale Laatiino, iyadda oo aaan loo egaynin jawaabtii ay ka bixiyeen isir kooda, kuwan oo dhamaantood ay tahay in ay ka jawaabaan.*

**Su'aasha #2:**
Fadlan dooro isiradda mid ama ka badan:

- Hindida Maraykanka ama Dhaladka Alaska
  *Qofka asal ahaan kasoo jeeda dadka Wuqooyiga, badhtamaha ama Koonfurta Ameerica marka lagu daro Mexico, kuwan oo kasoo jeeda qabiiladda ama ku xidhan bulshadaa*

- Asian-ka
  *Qofka asal ahaan kasoo jeeda dadka asalkoodu yahay Bariga fog, Koonfur Bari Aasiya, ama qaaradda hindida*

- Afrikaanka Maraykan ama Madoowga
  *Qofka asal ahaan kasoo jeeda dadka isirkoodu ku qototo Afrika*

- Dhaladka Hawaay ama kuwa kale ee Baasifiga
  *Qofka asal ahaan kasoo jeeda dadka asalkoodu yahay haawaay, Guam, Samoa, ama kuwa kale ee baasifiga*

- Cadaan
  *Qofka asal ahaan kasoo jeeda dadka asalkoodu yahayYurub, Bariga dhexe ama Wuqooyiga Afrika.*

Si ay hadaba nidaamkaa cusub uu sida ugu wanaagsan oga warceliyo asalka bulshadeena waxaa muhim ah in aad fahamto qaabka iyo sida ay ushaqeeyaan kuwaa, kuwa haa ku jawaaba su'aalaha laatiin-ka waxaa looga warbixin doonaa Laatiinoo iyadda oo aan loo eegin jawaabta ay ka bixiyeen isirkooda, fadlan si wanaagsan u eg halka aad kasoo jeedo ama/iyo halka ay kasoo jeedaan ubadkaagu goorta aaad dooranayso halka ku haboon ee aad kasoo jeedaan.marka laga soo tago Laatiino, dhamaan kuwa kale ee doorta isir ka badan waxaa looga warbixin doonaa "laba-asallayaal" nidaamka macluumaadkeena, inkasta oo aysan ahayn ikhtiyaar gooni ah oo iskii u taagan

Hadii aysan waaldka ama hagayaasha idmani soo gudbin halka aad kasoo jeedo shaqaalaha degmadda ee loo xilsaaray ayaa dooranaya mid ama labo ka mid ah su'aalahaa la idin waydiiyey, iyadii oo la eegayo wixii macluumaad ahaa ee horay lagaaga hayay, tan waxaa loo yaqaanaa Waxaa lagu tilmaamay aqoon hore oo loo lahaa, in uu qofku is tilmaamo ayaa haboon, hadiise aysan taa dhicin in sidaa kale loo tilmaamo waa talaabada ugu dambaysa ee degmadu qaadi doonto

# Su'aalaha Sida Badan La Iswaydiiyo

***Qoysaska Iyo Ardayda***

1. **Maxaad ugu baahantahay macluumaadkan?**

   Qaab dhismeedka bulshadeena waxa uu isu bedelayay si joogta ah tobaneeyadii sanno ee lasoo dhaafay. Annaga (Dugsiyadda Degmadda ama Gobolka) waxaa uu federaalku naga doonayaa in aad adeegsano nidaamka cusub, goboladda iyo dhamaan degmooyinka waxaa laga doonayaa sidoo kale.

   Waxaa jira sabab wanaagsan marka lagu daro shuruudaha uu federaalku doonayo, inkasta oo aanu si joogta ah uga warbixino si guud macluumaadkaa oo dhan federaalka ujeedada maalgelinta iyo qiimaynta. iyadii oo ay taasi la jidho ashtakadda xuquuqda madaniga. Waxaan sidoo kale u adeegsanaa macluumaadka isir iyo asal si loo qiimeeyo meelaynta iyo baahiyadda barnaamijyadeena kale, si loo siiyo adeegyadda ugu wanaagsan dhamaan ardayda oo dhan. Kani waa horumarinta la doonayo in ay raacaan hay'adaha bixiya Waxbarashadda iyo adeegyadda bulshadda.

2. **Qof walba mala waydiinayaa in uu is tilmaamo**

   Waxaasaradda Waxbarashaddu waxay ku dhiiri gelinaysaa dhamaan dugsiyadda iyo hay'adaha in ay u ogolaadaan dhamaan ardayda iyo shaqaalaha in sheegaan isirka ama asalka ay kasoo jeedaan iyadii oo la adeegsanayo nidaamka cusub, inkasta oo aysan tani ahayn shuruud, waa rajadda laga qabo degmadda in ay qabatinto dhamaan shaqaalaha iyo ardayda iyadii oo la adeegsanayo nidaamka cusun si loo hubiyo caafimaad qabka macluumaadkeena.

3. **Macluumaadka aan bixinayno miyaa loo adeegsan doonaa eegidda xaaladdeena hijro?**

   Maya. Macluumaadkan waxaa lagu ilaalinayaa shaqaalaynta ama diiwaanka ardayda waxaana lagu dhowray sharciga federaalka. Looma gudbin doono mid un ka mid ah hay'daha federaalka si laguu cadeeyo adiga am ubadkaaga. Qof la eegi doono xaaladiisa hijrana ma jirto iyadii oo la adeegsanayo macluumaadka aad bixisay.

4. **Dugsigu ma bixin doonaa Isirka iyo Asalka ubadkayga qolyaha kale?**

   Diwaanka Ardayda waxaa lagu dhowray Sharciga Diiwaanadda Waxbrashadda iyo Khusuusiyadda (FEPA). Nimdaaka cusub ee isirka iyo asalka ma saamayn doono FERPA illaalinta diiwaanka ardayda. FERPA uma astaysna asalka iyo isirka sida macluumaad toos ah, iyaguna waxay leeyihin illaalin la mid ah tan ay leeyihiin kuwa aan ahayn diiwaanka waxbarasho ee ardayda

5. **Qof walba miyaa laga doonayaa in uu doorto Isirka ama asalkooda?**

   Qof ay qasab ku tahay ma jirto in uu ka jawaabo su'aalaha. Walow bixinta macluumaadkaa ay kaaga dhigantahay in aan degmadda lagu qabsin in ay kuu doorato. Iyadii oo la adeegsanayo nidaamka federaalka, waxaanu ku qasbanahay in aan bixino jawaab innaga oo ku matalaynay hadii aad doorato in aadan bixin wax macluumaad ah oo ardaygaaga la xidhiidha

   Dowladda dhexe waxay ka doonaysaa degmadda dugsiyadda in ay ilaaliso kuwa doortay in aysan iscadaynin. Waxaanu aaminsanahay in is-sheegida qofku ay tahay ikhtiyaarka ugu haboon iyadii oo u diyaarsan in ay bixiso macluumaadka, caawinta qoysaska si ay udhiiri geliso in uu qof waliba isagu is-sheego

**6. Anigu waxaan ahayn Laatiino/Hisbaanik. Maxaan oga jawaabayaa su'aalo siyaado ah**

Waxyaabaha ugu wayn ee isbedelay waxaa ka mid ah in qof Laatiino/Hisbaanik ah uu noqon karo isirka ka duwan. Dowladda dhexe waxay doonaysaa in ay siiso Hisbaanik/Laatiinooga fursad ay si wanaagsan isugu cadayn karaan iyadii oo la eegayo dhaqanka iyo hidahooda. Sidaa awgeed haa, waxaa lagu waydiinayaa in aad mid ama labo aad doorato isiradda, xataa hadii aad doorataу in aad calaamayso mid ka mid ah Hisbaanik/Laatiino. Iyadii oo ujeedada keliya ee laga leeyahay ay tahay warbixin hadana dhamaan shakhsiyaadka ku jawaaba Haa su'aasha Laatiinoo waxaa looga warbixin doonaa Laatiinoo iyadii oo aan loo eegin asalka ama qaybta ay doorteen.

**7. Maxay tahay cadaynta illaaliyaha?**

Hadii qoyska, ardayga ama hagahu ay qabaan su'aal, tacliiq ama wax kasta oo kale tan la xidhiidha nidaamka cusub kadib marka ay gaadho macluumaadka oo daabacan, waxaa jira maamul tababaran oo jooga dhisme walba si uu ucaawiyo isheegidda ruuxa.

Hadii in uu qofku is-sheego la waayo, maamulku waxa uu adeegsan doonaa wax walba oo la heli karo si ay diiwaanka u dhamaystiraan. Tan waxaa loo duwi doonaa sheegida ilaalaynta waxaana la adeegsan doonaa ikhtiyaarkii ugu dambeeyey si degmadu ubuuxiso qawaaniinta federaalka islamarkaana ugudbiso diwaan damaystiran. Qaanuunka federaalka ayaa shardinaya in illaaliyuhu sheego hadii uu mudanuhu ka gaabsado arintaa.

8. **Sidee ku ogaanayaa in aniga iyo ubadkayga aan nala faquuqin?**

Xaalad ay suuragal tahay in ay dhacdo taasi ma jirto. Ujeeda ugu wayn ee uruurinta macluumaadkan waa sidii loo hubin lahaa in sida ugu haboon loo qaybiyey illaha iyo caawinta najaxa dhamaan ardayda. Gobolka iyo sharciyadda maxaliga ah waxaa loo unkay in ay hubiyaan in macluumaadka isirka iyo asalka aan loo gudbin meelo kale qaab uu un si isugu sheegay qofna.

Gobolka iyo degmaduba waxa ay raacayaan sharciyadda FERPA (Sharciga Diwaanka Waxbarashadda iyo Khusuusiyad Federaalka) si ay u ilaaliso diiwanka ardayda iyo shaqaalaha, sharciyadda in loo simanyahay shaqadda wax iska bedelay ma jiraan. Isirka iyo Asalkaaga looma adeegsan doono shaqaalayntaada.dhamaan sharciyaddu weli way shaqaynayaan tan ku jeeda dhamaan ardayda iyo shaqaalaha..

**9. Waxaa iimuuqata laba-isire in aysan ku jirin doorashooyinka, sidaas oo ay tahay waxaa looga warbixinayaa si dhan dhamaan macluumaadka ardayda, maxaa loola jeeda?**

Shakhsiyaadka ma haystaan doorasahdda is-sheegidda waxay ka dhigantahay laba-isire, waxa loo tixgelinayaa laba-isire hadii ay doortaan isir ka badan. Degmadu waxay oga warbixinaysaa shaqaalaha iyo ardayda doorta isir ka badan sida laba isire oo keliya, iyada oo dhamaan kuwa loo asteeyey isirka iyo asalka waxaa looga warbixin doonaa laba-isire.

**10. Hadii aan nahay qoys laba-isire ah ama shakhsiyaad laakiin dhaqan ahaan ku xidhan qayb kale, sidee u jawaabnaa??**

Doorashadda sida uu isu-sheegayo waxay ku xidhantahay sida uu shakhsigu isu sheegayo, isaga oo tilmaamaya dhaqanka/isirka ayaa naga caawin karta macluumadak degmadda in aan samayno astaan waxbarasho wanaagsan iyo helida tan ugu haboon ee heerka malgelinta barnaamijyadda gaarka ah.

*Hadii aad qabto su'aalo siyaadda ah, fadlan la xidhidh xafiiska dugsigiina; waxay kugu hagi doonaan maamulka kugu haboon ee ku caawin doona.*